



Wacaal ka soo Korodhay Adeegyada Xagaaga iyo Barnaamijyada Ardayda

Bulshada PPS ee Qaaliga ah,

Maadaama oo sanad-dugsiyedkii 2019-20 uu dhamaanayo, waxa aanu doonaynaa in aanu idinku wargelino adeegyada iyo fursadaha waxbarasho ee aanu rajaynayno in aanu bixino xagaagan inta aanu sii wadno la qabsiga xaaladaha isbedbedalaya inta lagu gudo jiro safmarka coronovirus.

Cuntooyinka ardayda

Waxa aanu ku faraxsanahay in aanu ku dhawaaqno adeega cuntada ee aanu siinaynay ardayda laga soo bilaabo xidhitaankii dugsiga 16 kii Maarso in uu socon doono inta lagu gudo jiro xagaaga. Inkasta oo aanu waayi doono laba meelood sabab dhisitaan awgeed, waxa aanu ku daraynaa goob cusub si aanu uga dhigno wadarta guud 14 iskuul oo ardaydu ka heli karaan quraac iyo qado Isniinta illaa Khamiista, laga bilaabo 11:30 g.h. illaa 1 g.d.

PPS waxa ay sidoo kale mar kale iskaashi la sameynayaan Xadiiqooyinka & Madadaalooyinka Portland si ay u bixiyaan cunno 13 xadiiqadood oo dheeri ah oo magaalada oo dhan laga bilaabo 22 ka Juun.

- [Eeg wakhiyada iyo goobaha cuntada ee PPS iyo Parks](#)

Fursadaha Waxbarasho ee Xagaaga

kooxahayagu waxa ay u abuurayaan fursado waxbarasho dhamaan ardayda iyo qoysaska inta lagu jiro xagaaga. Ardayda iyo qoysasku waxa ay sii wadi doonaan inay marin u helaan cutubyada barashada khadka tooska ah ee gaarka la ah nashaadaadka farshaxanada luuqadda, xisaabta, iyo aagag kale oo kobcin ah. Cutubyada waxbarashada ee PPS waxa laga heli karaa pps.net/student.

Intaa waxa dheer, waaxdayada Culuumta Bani-aadanimo waxa ay martigelineysaa Loolanka Akhrinta Xagaaga halkaasoo ardayda fasalada K-8 ay uga qeybqaadan karaan loolanka waxbarasho ee todobaadlaho ah fursadda helitaanka buugaagta, kaadhadhka hadiyadaha, iyo gudbitaanada goobaha soo jiidashada maxalliga ah sida OMSI. Macluumaad dheeraad ah waxa laga heli karaa [bogga Madadaalada Xagaaga 2020](#).

Khayraadka Waxbarasho ee La Beegsanayo

Muhiimadda ugu weyn ee PPS waa in ay dib looga hawlgeeliyo ardayda xagaaga fursado waxbarasho oo adag oo la siiyo ardayda, gaar ahaan bulshooyinka aan waxba haysan, fursad ay kula xidhiidhaan dugsiga oo ay ula qabsadaan xirfadaha aqoonta aasaasiga ah sida qorista iyo xisaabta.

Qeybta Waxbarida iyo Bulshada Iskuullada ayaa diiradda saareysa dadaallada barnaamijyada xagaaga ee qaybaha soo socda:

- Dugsiga Xagaaga ee Horumarinta Dugsiga ee siddeed dugsi oo baahi badan leh: Boise-Eliot/Humboldt, César Chávez, Lent, Rigler, Rosa Parks, Scott, Sitton, Dr. Martin Luther King Jr. (shaqsi ahaan & onlayn ahaan)
- Bartayaasha Xagaaga ee ardayda dugsiga sare (onlayn ahaan)
- Barnaamijyada Bedelka ah ee Xagaaga ee dugsiyada PPS
- Sanad Dugsiyeed Fidsan oo loogu talagalay ardayda qaadata adeegyada Waxbarashada Gaarka ah (onlayn ahaan)
- Barnaamijka Waxbarashada Qaxootiga (onlayn ahaan)
- Hore u Bilaw barnaamij xagaa kaas oo diiradda saaraya ardayda u gudbaya xanaanada, oo ay ku jiraan ardayda naafada ah (shakhsii ahaan)
- Akadeemiyada farshaxanka ee ardayda dugsiga dhexe ee bulshooyinka aan waxba haysan (shaqsi ahaan & onlayn ahaan)
- Kaamka xisaabta & ciyaaraha ee ragga midabka ah (shakhsii ahaan)
- Aqoon-isweydaarsiga cadaaladda cimilada ee loogu talagalay ardayda dugsiga sare (onlayn ahaan)

Fadlan la soco in barnaamijkayagu uu ku saleysan yahay tilmaamaha laga helo Waaxda Waxbarashada ee Oregon iyo Maamulka Caafimaadka Oregon, barnaamijyadanna waxaa lagu soo bandhigi doonaa qaab online ah ama, xaaladaha qaarkood, dhigitaan fasal oo shakhsii ahaaneed oo kooban. Barnaamijyadaya shakhsiga ah ee xaddidan, waxa aanu abuuri doonaa qorshe badbaado oo ku salaysan tilmaamaha ODE.

Sanad-dugsiyeedka 2019-20 Waxay u ahayd sidii wax dhib badan sida xasuustii ugu dambeysay dhammaanteen. Maadaama oo aynu sagootinayno ardaydeena fasalka afraad ee dugsiga sare, waxa aanu rajaynaynaa in aanu u sii wadno adeega, sida ugu wanaagsan ee awoodayada ah, ardaydayada cusub iyo kuwa soo noqonaya waxana aanu rajaynaynaa maalmo ifaya oo soo socda.